QIYAMKA 29
Salaamo Qoyska Dugsiga Degmada Gobalka DeKalb,

Inaga oo u sii dabaaldageyno dib u furida dhismooyinkeena, iyo ku saxida waxbarashada isku dhafka, way adagtahay in la iska dhaga tiro waxa gobolkeena iyo agagaarka wadanka. Sida ku badan, si qoto dheer leh ayaan uga naxsannahay dhacdooyinka daran ee dhacay Maarso 16 ee ka dhacay Gobolka Atlanta iyo Cherokee. Sare u kaca rabshada iyo naceybka ku aadan dadka waa midaan la ogolaan karin oo looma dulqaadan karo. Dugsiga Degmada Gobalka DeKalb (DCSD) waxay ka soo horjeedaa noocyo walb oo naceyb ah, cunsuriyad, iyo rabshad, iyo afkaaraheena waxay ku socdaan bulshada jasiirada Aasiyaanka iyo Baasifiga.

Waxaan anahay dugsiga degmada kala duwan, oo waxaan ugu dabaal dagnaa kala duwanaanshahaas qaab walba. Uma baahnin inaan lumino aragtida sifadaan muhiinka ah sababtoo ah tallaabooyinka dhoorka ah. Sida Dhaqtar Martin Luther King Jr. mar horay u yiri, “Cadaalo darada meel walba waxay halis ku tahay cadaalada meel walba.” Badqabka iyo fayo qabka dareenka ee dhammaan ardayda iyo shaqaalaha DCSD waxay marwalba ahaanayaan mudnaanta ugu horeyso.

Tallaalka iyo Baaritaanka COVID-19

Waan ku faraxsannahay inaan ku dhawaaqno Guddiga Caafimaadka DeKalb (BOH) wuxuu martigelinayaa Rugta caafimaadka Tallaalka oo shaqaalaha Maarso 20, ee Dugsiga Sare Elizabeth Andrews. BOH ayaa tallaali karo qiyaastii 1,250 macalimiin iyo shaqaalaha dhacdadaan. Waxaa la codsaday in shaqaalaha iska diiwaangeliyaan dhacdada iyada oo la isticmaalayo “dekalbschoolsga.org” ciwaanka i-meelka, haddii ay suurtogal tahay. Maadaama ay tani tahay dhacdo gaar ah ee loogu tallogalay DCSD, waxaan rabnaa inaan hubino in shaqsiyaadka u qalmo ee kale aysan iska diiwaangelin dhacdadaan. Fadlan ka fiiri i-meelkaaga degmada wixii tilmaamo dheeraad ah oo sida la isaga diiwaangeliyo.

Dugsiga Degmada Gobalka DeKalb waxay kaa shatay Xarumaha Baaritaanka COVID ee Bilaashka ah si ay u siiso baaritaanada COVID-19 shaqaalaha iyo qoysaska. Baaritaanka waxaa loo helayaa macalimiinta iyo xubnaha shaqaalaha Isniinaha, Tallaadooyinka iyo Arbacooyinka ee Dugsiga Sare Cross Keys ka bilow 11 a.m. illaa 5 p.m.; iyo Tallaadooyinka, Arbacooyinka iyo Qamiisaha ee Dugsiga Dhexe Bethune laga bilaabo 7 a.m. illaa 1 p.m.

Jadwalka wuxuu soconayaa inta lagu jiro dhammaadka simistarka dugsiga. Si aad u balansatid balan, fadlan booqo www.freecovidtesting.us. Xullo ‘Diiwaangelinta Degdega ah’ ee lagu balansanayo balantaada oo dooro goobta dugsiga.

Maalinta Goobta

Waxaan qaatay waqti cajiib ah ee la kulmida hogaamada Region IV oo Maalinta Dalxiiska DCSD. Waxaan helay fursada oo si fogaan ah lagula kulmayo kooxda hogaaminta Dugsiga Hoose Stone Mountain, kormeeray waxbarashada koox yar ee Dugsiga Hoose Indian Creek oo si fogaan ah u booqday kulanka Qorshaha Tallaabada Muddada-Gaaban (STAP) ee Dugsiga Dhexe Champion Theme.

Region IV waxay sameynayaan shaqo cajiib ah iyaga oo dajinayo yoolalka oo hubinayo waxbarasho tayeysan oo dhammaan aqoonyahanadeena. Waxaan rabaa inaan u mahadceliyo Kormeeraha guud ee Goboleedka ku meelgaarka Dhaqtar Antonette Campbell oo balanqaadkeeda ku aadan aqoonyahanadeena.

7-Maalin Kartoonka Cuntada Barafeysan

Dhammaan ardayda DCSD, 18 sanno jir iyo ka yar, waxay hadeer heli karaan 7-maalin kartoomada cuntada barafeysan iyo miro iyo qudaar. Qeybinta cuntada waxay dhaceysaa Arbacada laga bilaabo 11 a.m. illaa 2 p.m. Wixii warbixin dheeraad ah, riix halkaan.

Barnaamijka Waxbarashada Kuleelaha MOSAIC

Waan ku faraxsannahay inaan ku dhawaaqo in Degmada ay siineyso ardayda barnaamijka waxbarashada cusub kuleelahaan. Barnaamijka Waxbarashada Kuleelaha MOSAIC wuxuu bixiyaa fursadaha waxbarashada oo dheeraad ah oo lagu sheegayo dib u dhaca tacliinta iyo qasaaraha waxbarashada. Barnaamijyada MOSAIC waxaa ku jiro xirfadaha aasaaska farbarashada iyo xisaabaha, barashada luuqada, soo kabida buundada ama dadajinta, STEM/STEAM, buundada kuleelaha iyo xerooyinka kobcinta. Manhajka waxaa loo naqshadeeyay waaya aragnimooyinka waxbarashada waxtarka ah ee Juun iyo Luuliyo 2021 oo gaarsiiyo ardayda taageerada loogu tallogalay, la bartilmaameedsaday oo lagu sheegayo meelaha banaan waxbarashada.

Barnaamijyada waa bilaash, si kastaba, haddii ardayga dugsiga sare koorso ka qaadanayo dhinaca Dugsiga Fogaanta Georgia ama machadyada kale ee la aqoonsanyahay, waxaa jiro qidmooyin koorsadiiba. Degmada waxay ku dhiirogelineysaa ardayda oo dhan inay ka faa'ideystaan barnaamijka loogu tallogalay kobcintooda.

Warbixin dheeraad ah way imaaneysaa.

Hoolka Magaalada

Waxaan rabaa inaan u mahadceliyo waaladiinteena iyo macalimiinta daawaday oo ka qeybqaatay hoolkeena magaalada fogaanta hadeer. Waan ka mahadcelinay jawaabtaada, iyo badelada sida aan u bixinay sharaxaadaha ku saabsan qorshaha dib u furida degmada. Haddii ay ku dhaaftay hoolka magaalada, fadlan riix halkaan si aad u daawatid.

Gollaha La talinta Bulshada Kormeeraha guud

Waxaan rabaa inaan u mahadceliyo jaalalka bulshadeena iyo Gollaha La talinta Bulshada Kormeeraha guud (SCAC) oo la kulmida kooxdeena isbuucaan. Howlgalka SCAC waa taageerid siinta, hagida, iyo hogaaminta ku aadan kormeeraha guud oo arimaha ku saabsan tacliinta degmada, howlgalka, iyo fayo qab dhaqaalaha.

Iskaashigaan wuxuu muhiim u yahay degmada. Ka qeybgalka bulshada iyo ka qeybgalka ka midka ah dhammaan daneeyayaasha waa muhiimada dugsiga degmada oo lagu guuleysanayo.

Deeqda Sanduuqaha Saadadka COVID-19

Waxaan rabaa inaan u mahadceliyo Ururka DeKalb ee REALTORS oo deeqdooda deeqsiga ah ee ku aadan Dugsiga Hoose Peachcrest. Ururka wuxuu ku deeqay 50 sanduuqyada saadka COVID-19 ee macalimiinta oo dadaalka lagu caawinayo iyaga inay joogteeyaan fasalada nadiif iyo badqab ah. Sanduuqyada waxaa ku jiro tirtirashada, jeermisdilaha gacmaha, maaskarooyinka wajiga, daboolada wajiga iyo Lysol. Ururka DeKalb ee REALTORS waxay u kaashadeen DCSD dhoor sanno, oo waan ku faraxsannahay iskaashigaas.

Waxaan rajeynayaa inaan bulsho ahaan u sii wadno inaan usu muujino naxariis oo aad halkaas usu joogtaan inaga oo qorsheyneyno qaabkeena ee dhammaadka safmarkaan caalamka iyo saameynta imaan karto ee saameynta kadib.

Daacadnimo,

Marwo Cheryl Watson-Harris